Maareynta Wareega Mashruuca

Wareega Mashruuca - Guudmar p. 2

1. Wajiga Aqoonsiga iyo Qorsheynta p. 4

1.1 Tababarka shaqaalahaada ee aragtida Wareega Mashruuca
1.2 Aqoonsiga dhibaatooyinka dhabta ah iyo baahida
1.3 Falanqeynta Danwadaagta
1.4 Falanqeynta Dhibaatada
1.5 Qorshaha Mashruuca iyo naqshada
1.6 Qorshaha istaraatiijiga ah
1.7 Qeexida Tilmaamayaasha
1.8 Cabirka tilmaamayaasha
1.9 Qorshe Hawleedka
1.10 Miisaaniyada
1.11 Qiimeynta halista natiijo xun

2. Wajiga Fulinta iyo Kormeerka p. 16

2.1 Kormeer
2.2 Saameynta Qiimeynta ka Qeyb-qaadashada (PIA)
2.3 Qeybinta Macluumaadka

3. Wajiga Qiimeynta p. 21

3.1 Qiimeynta Ula-jeedooyinka
3.2 Qiimeynta ka Qeyb-qaadashada

4. Wajiga la Qabsashada p. 24

4.1 Casharada Quudinta oo horay loo soo bartay oo dib loogu isticmaalo qorsheynta

Daabacad dib loo eegay, March 2017
Markii hore waxaa la daabacay 2009

www.networklearning.org

Wareega Mashruuca - Guudmar

Wareega mashruuca waxa uu ka kooban yahay afar marxaladood:

1. **Aqoonsiga** iyo **qorsheynta,**
2. **Fulinta** iyo **kormeerka**,
3. **Qiimeynta,** iyo
4. **La qabsashada**.

Marxalad kasta waxa ay leedahay sifooyin u gaar ah iyo aqoon gaar ahaaneed iyo waayo-aragnimo.

Jaantuska wareega mashruuca:



Wajiga Aqoonsiga mararka qaarkood waxaa lagu magacaabaa wajiga Qiimeynta aqoonsiga, maadaama xiligaan sababta mashruuca ay aad muhiim ugu tahay in la is weydiiyo. Waa Marxalada, la aqoonsan karo dhibaatooyinka dhabta ah iyo arimaha loo baahan yahay in wax laga qabto.

Wajiga qiimeynta waxaa daba socda wajiga **qorsheynta** midkaas oo ulajeedooyinkiisa ay qeexan yihiin waxqabashada qorshahana si taxadar leh loo baaray. Intaas kadib, qorshe hawleed degsan waa in lala yimaadaa, ilaha kheyraadka waa la dejinayaa, isticmaalka kaabayaasha dhaqaale ayaa qorshe ahaan la dejinayaa. Marxaladaan markii ay arintu mareyso, waxaa lagama maarmaan ah in laga fikiro oo la cayimo tilmaamayaasha la isticmaali doono si loo kormeero loona qiimeeyo mashruuca.

Wajiga Fulinta,inta lagu guda jiro dhab ahaan fulinta mashruuca, waxaa loo baahan yahay in lala yimaado **kormeer** joogta ah, si loo eego haddii mashruucu uu ku socdo wadadii saxda aheyd ee loogu talo-galay, iyo in la haleelayo ulajeedooyinkii looga dan lahaa lana isticmaalayo ilaha kheyraadka siduu qorshahu ahaa.

Inta lagu guda jiro **qiimeynta** wajiga mashruuca laguna cabiraayo ulajeedooyinkiisa si loo eego haddii ulajeedooyinka looga dan lahaa la gaaray – iyo sidoo kale in la eego sida hawshaan loo qabtay iyo waxa uu yahay qorshaha saameynta. Si kale

haddii loo dhigo, waa maxay sababta natiijada isbedelka dhacay dhanka hawlaha mashruuca?

Ku saleysan qiimeynta, **la qabsashada** mashruuca waa uu qabsoomi karaa waana la aqoonsan karaa casharada wax ku ool ka ah oo loo isticmaali karo qorshaha mustaqbalka.

Wareega qorshaha waa mid si isdaba joog ah u socda: kadib qiimeynta iyo la qabsashada, qorsheynta ayaa mar labaad bilaabmeysa, waxaana daba socda fulinta & kormeerka, iwm.

Maareynta Wareega Mashruuca (MWM)

Maareynta wareega mashruuca waa hal ku dhig loogu magac-daray geedi-socodka qorsheynta iyo maareynta mashaariicda, barnaamijyada, iyo hey'adaha.

Si looga dhigo horumarinta mashruuca mid lagu guuleysto, waxaa loo baahan yahay qorshe wanaagsan. Qaar ka mid ah arimo muhiim ah oo u baahan in la tixgeliyo, qaasatan baahida iyo aragtida danwadaagta.

* "Danwadaagta" waa eray loo isticmaalo qof kasta oo daneynaya mashruuca. "Danwadaagta ugu horeysa" waa dadka kuwaas, oo laga filaayo inuu mashruuca caawin doono – macaamiisha, kooxaha la bartilmaameedsanayo, ka faa'iideystayaasha mashruuca. Kuwa kale oo danwadaag ah waxaa ka mid noqon kara hogaamiyeyaasha maxaliga ah, bulshada, shaqaalaha hey'adaha, iyo kuwa deeqda bixiya.

MWM wuxuu hubinayaa in dhamaan dhinacyada mashruuca ay ka mid noqdaan hawlaha maareynta. Qeyb kasta oo ka mid ah wareega mashruuca waa in la tixgeliyaa, isbedel kasta waa la ogaanayaa waxaana loo tixgelinyaa qorsheynta mashruuca mustaqbalka iyo naqshadeynta. In loo shaqeeyo habkaan oo kale waxa uu soo kordhinayaa guul iyo in uu mashruucu noqdo mid waara.

1. Wajiga Aqoonsiga iyo Qorsheynta

Inta lagu guda jiro wajiga qiimeynta iyo qorsheynta waxaad arki doontaa:

* **Aqoonsiga** dhibaatooyinka dhabta ah iyo arrimaha u baahnaan doona in wax laga qabto, ayada oo arintaas loo marayo habka ururinta macluumaadka;
* Tixgelinta mashruuc la qaban karo;
* Inaad degsato **ulajeedooyinkaada** iyo **hadaf aad leedahay**;
* La imoow **qorshe hawleed**;
* Si taxadar leh u qorsheyso isticmaalka **ilaha kheyraadka**;
* Aqoonso **tilmaamayaasha** loogu talo-galay kormeerka iyo qiimeynta.

Hey'ado badan ayaa isticmaala marxaladaan oo kale **qaab macquul ah**. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa uu yahay habka macquulka ah (ama 'qaabka macquulka ah') iyo sida loo isticmaalo waxaad ka heli kartaa baraha hoos ku qoran:

* *'Project Cycle Management'* **–** Daabacada Maareynta Wareega Mashruuca ee Tearfund (Qeybta 2.4): **http://tilz.tearfund.org/~/media/Files/TILZ/Publications/ROOTS/English/PCM/ROOTS_5_E_Full.pdf**
* *'Project Cycle Management Guidelines'* – Tilmaamaha Maareynta Wareega Mashruuca ee EuropeAid (Qeybta 5): **https://ec.europa.eu/europeaid/sites/devco/files/methodology-aid-delivery-methods-project-cycle-management-200403_en_2.pdf**

1.1 Tababarka shaqaalahaada ee aragtida Wareega Mashruuca

Haddii shaqaalaha hey'adaada aysan u baranin qalabka isticmaalka Wareega Mashruuca maamul ahaan, ka fikir inaad isticmaasho **buugga waxbarashada** ee Networklearning:
http://networklearning.org/index.php/library/the-project-cycle
waxaa loogu talo-galay in ay ayaga gaarsiiso ka fikirka wareegyada. Tusaalooyinka loo isticmaalay buugga waxaa laga soo xigtay meelaha aad adiga waayo-aragnimo u leedahay (dhisida guryaha kadib markii ay musiibo timaado) hase yeeshee waxaad la imaan kartaa meelaha aad adiga waayo-aragnimo ku leedahay, si loo hubiyo in dadka dhaqan-gelinayaan waxa ay baranayaan.

Tearfund's *Project Cycle Management* publication [eeg lifaaqa kor ku xusan] waxaa loo isticmaali karaa qorsheynta barnaamijyada sidoo kale maamulka iyo horumarinta hey'adaha.

Waxaa jira oraah: "Haddii aad ku guul dareysato inaad qorshe sameysato, qorshahaadu waa fashilmayaa." Ka fikir tusaalooyinka markii wax qaldamaan maxaa yeelay qorshaha looma hirgelinin si haqabtiran.
Waa maxay sababaha ay wax u qaldameen? Waa maxay waxyaabaha aan lagu xisaabtamin?'

1.2. Aqoonsiga dhibaatooyinka dhabta ah iyo baahida

Talaaboyinka ugu horeeya ee Wareega Mashruuca waxaa ka mid ah aqoonsiga dhibaatooyinka dhabta ah iyo baahida taagan.

* Waa maxay baahida ama dhibaatooyinka jira iyo dadka ay saameyso?
* Maxay yihiin awooda iyo awood-yarida ay leeyihiin dadka kala duwan oo ay marxalada saameysay, midaas oo saameysa awoodooda si wax looga qabto dhibaatadooda?
* Maxay nafsadooda u qaban karaan?

Waxaa laga yaabaa inaad horay ka hesho macluumaad farabadan, aadna ka heysato aragti fiican oo ku aadan waxaad dooneysid inaad qabato. Si kastaba ha ahaatee, macluumaadkaan waxaa dhici karta inuusan dhameytirneyn marka loo eego sidaad u garatay. Hawl si firfircoon loogu soo ururiyay macluumaad ayaa dhici karta in ay keento aragti dheeraad ah.

Macluumaad sax ah, lagu kalsoon yahay oo haqabtiran ayaa lagama maarmaan ah si loo:

* Dejiyo qorshe waxtar leh oo hufan;
* Ogaado dhamaan arimaha iyo duruufaha kuwaas oo saameyn ku yeelan kara mashruuca, sida tusaale ahaan macnaha uu mashruuca ku dhici doono;
* Fahmo sababaha keenay dhibaatooyinka ama duruufaha taagan;
* Ogaado waxa ay sameynayaan dadka kale, si looga fogaado nuqul ka bixin iyo in la eego halka iskaashi looga baahan yahay;
* Qeexo habka ugu saxsan si looga jawaab bixiyo baahida jirta ama dhibaatada;
* Helo cudur-daar aragtidaada waxqabad iyo isticmaalka ilaha kheyraadka.

1.3 Falanqeynta Danwadaagta

Talaabada ugu horeysa ee aqoonsiga dhibaatooyinka iyo baahida waa falanqeynta danwadaagta. Danwadaagtu waa kuwa si toos ah ama si dadban ugu lug lahaada go'aan ka gaarida waxa laga doonayo in mashruuca ama barnaamijka looga guul kaaro. Waxaa ka mid noqon kara dadka ka faa'iideystayaasha ah, shaqaalaha mashruuca ama barnaamijka, maamulka (kuwa heer maxaliga ah, goboleed, qaran ama caalami), baarayaasha, hey'adaha dowlada iyo deeq bixiyeyaasha.

Wareega mashruuc wax ku ool ah oo hufan waxa uu u baahan yahay hab **ka-qaybqaadasho,** oo ay ku lug leeyihiin dhamaan danwadaagta wajiyada wareega mashruuca, gaar ahaan go'aan qaadashada:

* Nidaam dhab ah oo ku saleysan ka-qaybqaadashada waxa uu xoojin dooonaa jawaab ka celinta iyo keenida dareen lahaansho, taas oo kordhineysa suurto-galnimada guul ka gaarida ulajeedooyinka mashruuca.
* Markii ay dadku u go'doomaan mashruuca, tani waxa ay kordhineysaa waaritaanka qorshaha.
* Isticmaalka aqoonta maxaliga ah iyo khibradaha waxa ay xoojin kartaa wax ku oolnimada iyo ka fogaanshaha khaladaadka.
* Marka danwadaagta la siiyo macluumaad ku filan iyo awooda go'aan gaarida, kadib daahfurnaanta iyo xisaabtanka ayaa wanaagsanaada. Dadka waxaa

lagu war geliyaa waxa meesha ka socda iyo sababta, iyo in ay helaan mas'uuliyad gaar ah dhanka mashruuca.

In aad ogaato kuwa danwadaagta aad tihiin iyo inaad aragti buuxda ka haysato dhibaatooyinka meesha ka taagan, taasi waxa ay kuu hogaamineysaa su'aalaha soo socda:

* Waa maxay macluumaadka aad xaqiiqo ahaan u baahan tahay, waa kuma dadka laga soo xigtay?
* Sidee baad u ururineysaa?

— **Qiimeynta Baahida** ama **PRA** ayaa noqon kara qalabka saxda ah. Isticmaal macluumaadka Networklearning*: ururinteeda iyo isticmaalka Wareega Mashruuca si uu kuu caawiyo*:
http://networklearning.org/index.php/library/information-its-collection-and-use
— **Falanqeynta Kooxda Xalinta** waxa ay noqon kartaa qalabka loo isticmaali karo ururinta macluumaadka:
http://networklearning.org/index.php/library/key-information-sheets

Qiimeynta Baahida markasta waa hawl ka gaar ah – koox laga soo dhex saaray Hey'adaha aan dowliga aheyn iyo anshaxa kale ayaa ku dhaqaaqa oo ku qaadata todobaad ayaga oo la fadhiisanaya danwadaagta heerka koowaad. Hase yeeshee qaar ka mid ah hey'adaha aan dowliga aheyn horay ayay qorshe ula imaanayaan. Haddii danwadaagta heerka koowaad ay dhow yihiin, kuna nool yihiin guryo isku raran ah ama xeryo qaxooti, waxaa dhici karta inaad horay u dhisatay ururinta macluumaadka hawlahaada caadiga ah ee hey'ada aan dowliga aheyn: tusaale ahaan, laba ka mid ah shaqaalaha kuwaas oo ku qaatay galbihii todobaad booqashada dhowr qoysas ama dadka qaar ka mid ah oo ururiya macluumaad si hagaagsan. Xaaladan oo kale, hey'adaada waxay ba heysataa macluumaad ku filan si ay ugu saleyso qorshaha mustaqbalka iyo go'aamada.

Marka lagu daro danwadaagta heerka koowaad, ilo kale oo macluumaad laga heli karo waxaa noqon kara khubaro aan ka soconin kana mid aheyn hey'adaada. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad hubisaa in waxa ay leeyihiin si fiican loo tixgeliyo. Maba jiro hey'ad aan dowli aheyn oo leh khubaro ku filan. Baahida Qiimeynta sidaas daraadeed waxaa loo sameyn karaa ayada oo lala tashanayo khubaro kale – tusaale ahaan, dadka ka shaqeeya xafiisyada dowlada ama shirkadaha gaarka loo leeyahay. Haddii ay ku quseyso xaalad saboolnimo, waxaa dhici karta inaad isku daydid inaad ku darto khabiir aqoon u leh ganacsiga yar yar; haddii aad xiiseneyso caafimaadka iyo xanuunka, waxaad ku darsan kartaa shaqaalaha maxaliga ah ee caafimaadka. Dhisida iskaashi lala sameeyo dadkaan oo kale ayaa ah shaqo qiimo weyn ku fadhida.

Inta badan kooxaha danwadaagta heerka koowaad, waxa ay ka qeyb qaadan karaan kaalin weyn hawlaha lagu baadi goobayo waxa ay yihiin dhibaatooyinka, waxaana ka mid ah caruurta da'doodu ay ka weyn tahay todobo jirka, dadka cudurada nafsiga ah ku dhacay, dadka waayeelka ah, sidoo kale dadka ay haysato baahida waxbarashada gaarka ah – waxaa dhici karta inay weli awoodi karaan xiriirka haddii aad ugu sheegto si taxadar iyo xushmad leh, "Waa maxay dhibaatooyinkaada?", "Meel noocee ah ayaad doonaysaa inaad ku noolaato? Waa maxay sababta?" Waxa ayna u qalmaan in aragtidooda la dhegeysto.

Waxaa muhiim ah in la qiimeeyo baahida ayada oo la waafajinaayo **baahida qiimeynta jinsiga** – eeg liiska warbixinta ee Networklearning kuna saabsan Arrimaha Jinsiga oo ku qoran Wareega Mashruuca:
http://networklearning.org/index.php/library/incorporating-gender-into-your-ngo

Maadaama raga iyo dumarka ay kala leeyihiin waajibaad kala duwan, sidoo kale waxa ay kala leeyihiin baahi kala duwan. Dhalista caruurta waxa ay u baahan tahay daryeelka dhalmada iyo helitaanka adeeg daryeel caafimaad oo u gaar ah. Madaxa reerkana waxa uu u baahan yahay khibradaha iyo habka lagu heli karo dakhli ku filan reerka.

Baahida waxaa loo qeybin karaa qaar wax ku ool ah iyo qaar istaraatiiji ah.

Baahida wax ku oolka ah bixinta biyaha, daryeelka caafimaadka, bixinta qalabka wax soo saarka beeraha, ama helitaanka dakhli lagu maareeyo qoyska. Baahidaan ayaa inta badan waxa ay xiriir la leeyihiin hawlaha gaarka ah ee raga iyo haweenka, oo ay ku jiraan hawlaha dhalmada iyo wax soo saarka. Ogow in ka jawaab bixinta baahida wax ku oolka ah waxa ay xal u tahay dhibaatooyinka wax ku oolka ah hase yeeshee sida caadiga ah waxba kama bedeli doonto marka la eego cilaaqaadka awooda, gacan-ku-heynta ilaha dhaqaale ama awooda go'aan qaadashada.

> *Tusaale ahaan:bulshada waxa ay dareemi kartaa in ay heysato dhibaato daran oo ay ka mid tahay nafaqo-daro dhanka caruurta iyo in ay qabaan aragti lagu hagaajin karo xaalada ayada oo la beerayo khudaar*

Marka laga eego dhanka **baahida istaraatiijiga ah** waxa ay u dhigan tahay ayada oo la eegayo dhanka cilaaqaadka awooda, xuquuqda helitaanka iyo gacan-ku-heynta ilaha dhaqaale, iyo go'aan qaadashada. Tusaalooyinka baahida istaraatiijiga ah waxa ay noqon kartaa:helitaanka amaahda iyo ilooyin dhaqaale oo kale;

* Cabirka ku aadan rabshadaha;
* Xoriyada go'aan qaadashada;
* Xuquuqda lagu lahaan karo dhul ama hanti.

Ka jawaab celinta baahida istaraatiijiga ah waxa ay saameyn ku yeelaneysaa, oo ay sida laga rajeynayo isbedel ku sameynaysaa, arimahaan hoos ku qoran.

> *Tusaale ahaan:*
> *— isbedel lagu sameeyo sharciga sidaa daraadeed haweenka waxa ay awood u lahaan karaan in ay lahaadaan hanti si loo bedelo waa kuma qofka gacan-ku-heyn kara lahaanshaha dhulka.*
> *— abuuritaanka iskaashi waxaa dhici karta in ay awood siiso raga, haweenka ama labadaba si loo helo sicir wanaagsan dalaga beeraha.*

1.4 Falanqeynta Dhibaatada

Mar haddii baahida iyo dhibaatooyinka la aqoonsado, talaabada xigta waa falanqeynta.
Dhibaato iskeed u taagan ma jirto. Markastana waa qeyb ka mid ah sabab-iyo-saameyn, dhibaatooyin iyo siyaabooyin iyo saameynta, marka hore waa in la aqoonsadaa si loo dejiyo qorshe wanaagsan.

Layli inta badan la isticmaalo waa in la sawiro **geedka dhibaatada**, halkaas oo ulajeedooyinka mashruuca laga soo qaadan karo. Layligaan waxaa lagu soo tilmaamay qeybta 2.3 ee Tearfund's *Project Cycle Management* publication [eeg lifaaqaan oo ku yaala bogga 4aad] iyo bogga 67 – 69 ee Europe Aid's *Project Cycle Management Guidelines* [eeg lifaaqa ku yaala bogga 4aad].

Geedka dhibaatooyinka waxa uu awood kuu siinayaa:

* Inaad hoos ugu degto xididka baahida danwadaagta iyo dhibaatooyinka;
* In la baaro saameynta dhibaatooyinka;
* In laga fikiro wadooyinka wax looga qaban karo dhibaatooyinkaan;
* In la qeexo mudnaanta.

1.5 Qorshaha Mashruuca iyo naqshada

Talaabooyinka xiga ee Wareega Mashruuca waxaa ka mid ah go'aan qaadashada waxa mashruucu qabanayo iyo qorsheynta sida loo keeni karo isbedelada la doonayo. Si loo hubiyo arintaas waxaad ka heleysaa meesha aad doonaysid inaad aado, dooro hadaf iyo ulajeedooyin kuwaas oo la soconaya ka tarjumida aragtida hey'adaada aan dowliga aheyn.

Hadaf waa ujeedada guud ee mashruuca.

> *Tusaale ahaan:*
> *— in yareeyo nafaqo-darada caruurta yar yar.*
> *— in la hagaajiyo ka helitaanka biyo nadiif ah tuulooyinka.*

Ulajeedooyinka waa kuwa gaar ah, waa in laga guul gaaraa natiijooyin lagu cabiri karo waqti gaar ah oo cayiman. Waxay u baahan yihiin inay noqdaan kuwa xaqiiqo ku dhisan oo macquul ah. Mid kasta waxa uu u baahan yahay ilaha kheyraadka – dhaqaale maaliyadeed, xoogga dadka ama kuwa kale – arimahaan waa in la helaa ama suurto-gal ay tahay in la heli karo.

Isbedelo noocee ah ayaa la doonayaa? Ulajeedooyinka waa xaaladaha la filaayo mustaqbalka, ma ahan hawl iyo shaqo. Waxaad ku qeexi kartaa ulajeedooyinka mashruuca adiga oo baaraya qiimeynta baahidaada iyo falanqeynta dhibaatooyinka. Layliga Geedka dhibaatada waxa uu kugu caawin doonaa sida dib loogu bedelo dhibaatooyinka ulajeedooyin [eeg lifaaqa bogga 4aad hadaad u baahan tahay hagitaan]. Qoraalka ulajeedo inta badan waa iska fududud yahay waana u bedelida bayaanka xaalad dhibaato.

Tusaale ahaan bayaanka dhibaato waa in beeraleyda aysan heli karin macluumaadka sicirka wax soo saarka beerahooda. Ulajeedo kadib waa in beeraleydaan ay heli karaan macluumaadkaas.

Halkan hoos waxaa ku qoran sadex ulajeedo…

Laba waa mudo dheer:

* *"Sadex sano gudahood, 75% qoysaska ka mid ah bulshada mashruuca ka faa'ideysaneysa in ay lahaadaan beero khudaar ah"*
* *"Sadex sano gudahood, caruurta ay da'doodu ka hooseyso 5 sano waxa ay cuni doonaan khudaar fara badan oo dheeraad ah"*

Midna waa mudo gaaban:

* *"Meesha lagu gaaro bisha Oktoobar,qoys kasta waxa uu heli doonaa miraha abuurka beeraha, bacrimin, iyo qalabka beeraha sicir la awoodi karo oo jaban"*

Is weydii nafsadaada haddii sadexdaan ulajeedo ay yihiin kuwa is waafaqaaya, macquul ah (oo la awoodo in la sameyn karo) iyo mid la cabiri karo. iminka, si loo gaaro hadaf kasta, waxa aad u baahan tahay inaad qeexdid sida aad u dooneyso hawsha inaad u qabato – iyo in aad ku hageyso isticmaalka istaraatiijiyada degsan.

1.6 Qorshaha istaraatiijiga ah

Kadib falanqeynta, waxa aad go'aansatay waxa aad dooneysid inaad bedesho ama waxyaabaha u baahan in la bedelo. Hase yeeshee, sidee baad ku keeni kartaa isbedelkaas? Geedi socodka qorshaha sida aad ku hirgelin karto ayaa lagu magacaabaa Qorshaha Istaraatiijiga ah.

Mararka qaarkood dhowr dhibaato ayaa loo baahan yahay in wax laga qabto isla hal waqti, taas oo macnaheedu yahay in aad la timaado mashaariic dheeraad ah. Mashruuc kasta waxa uu u baahan yahay in la qiimeeyo marka laga eego:

* Khubarada loo baahan yahay
* Waqti mudo intee le'eg ayaa loo baahan yahay in la geliyo
* Nooca miisaaniyada loo baahan yahay
* Danwadaagta kuwee ayaa ku lug lahaan karo

Si aad u qiimeyso fursadaha istaraatiijiyada, EuropeAid's *Project Cycle Management Guidance* [eeg bogga 4aad] talooyinka loo isticmaalayo su'aalahaan muhiimka ah oo hoos ku qoran:

* Maxaa suurto gal noqon kara si loogu xaliyo dhibaatada?
* Dhibaatada ugu horeysa oo mudnaanta leh ma lagu xalin karaa hal ama laba mashruuc ama ma lagama maarmaanbaa in la degsado mashaaric kale oo is barbar socda kuwaas oo dhamaan diirada lagu saarayo dhibaatada ugu horeysa oo mudnaanta leh?
* Dhibaatooyinka iyo ulajeedooyinka ma isku dhigmaan?
* Waa maxay ilaha kheyraadka la heli karo?
* Waa maxay waxyaabaha hey'adaha wax fulin kara ay awood u leeyihiin inay sameeyaan?

* Waa maxay mashaariicda kale ama dadaalada kale ee qorsheysan ama isla waqtigaan la hirgelinayo?
* Hadii uu mashruucu guuleysto, mala joogteyn karaa?

1.7 Qeexida Tilmaamayaasha

Tilmaamayaasha waa lagama maarmaan si loo cabiro saameynta mashruuca (saameynta tilmaamayaasha), si loo kormeero hawlaha socda, iyo si loo ogaado fogaansho intee le'eg ayaa laga guul gaaray ulajeedooyinkii degsanaa (Tilmaamayaasha geedi socodka hawlaha). Tilmaamayaashaan waa nooc ka mid ah cabirka lagu heshiiyay markii hore ee marxalada qorsheynta. Waxaana loo isticmaalaa si diirada loogu saaro horumarka laga gaaray ulajeedooyinka.

Waxaa jira dhowr shuruudood oo loogu talo galay tilmaamayaasha wanaagsan. Tilmaame waa inuu ahaadaa:

* **Mid la xiriira ulajeedada uu cabirayo**.
  Tusaale ahaan: haddii ulajeedadu ay tahay in caruurta ay cuni doonaan yaanyo dheeraad ah, tilmaame 'in la kordhiyo tirada qoysaska beera yaanyadda' ma noqon karto arin la xiriirta, maxaa yeelay waxba kama oraneyso yaanyada ay cuni doonaan caruurta.

* **La cabiri karo**. Tilmaamaha xaqiiqo ahaan mala awoodaa in la cabiro?
  Tusaale ahaan: side baad u cabiri kartaa 'caruur badan in si fiican loo quudin doono' – ma isticmaali kartaa kaararka Wadada Caafimaadka oo horay u degsaneyd taas oo cabireysa xajmiga da'da?

* **Ku filnaansho**. Hal tilmaame miyuu ku filan yahay ama waxaa loo baahan yahay in ka badan hal si loo cabiro horumar intee le'eg ayaa laga gaaray ulajeedooyinkii degsanaa?
  Tusaale ahaan: haddii hadafku uu yahay in la hagaajiyo fayadhowrka tuulada, tilmaamayaasha kuwee baad u baahan tahay inaad ku cabirto arintaan?

* **Laga guul gaari karo**.
  Tusaale ahaan:Tilmaame, tusaale ahaan sida 'Mudo hal sano ah waxaa ka jiri doono tuulada nafaqo-daro fara badan' tani Malaga guul gaari karaa? Tilmaame aad looga guul gaari karo waxa uu noqon karaa: 'mudo sadex sano ah, celcelis ahaan boqolkiiba 7% caruurta nafaqo-darada haysa waa la yareyn doonaa haddii aad qeexdid nafaqo-daro adiga oo isticmaalaya boqolkiiba ee Wadada Caafimaadka'.

* **Faahfaahin.** Xaalada tayada, tirada iyo waqtiga loo baahan yahay oo la cayimo.

* **La Qabsashada**. Waa in ay suurto gal ahaato si loola qabsado tilmaamaha si loogu ogolaado isbedelada kuwaas oo ka dhex dhacayo mashruuca.

* **Kharashka wax ku oolka ah**. Ilaha kheyraadka – xoogga dadka, dhaqaale, iyo kuwa kale – ayaa loo baahan yahay si loo cabiro tilmaamayaasha in ay yihiin macquul gal iyo in ay is waafaqayaan saamiga kharashka mashruuca.

* **Waxyaabaha la heli karo.**
  Tusaale ahaan: in la cabiro dakhliga mudooyinka aan wax dalaga beeraha aan la iibin, waxaa laga yaabaa inay suurto gal noqonin.

Sida la doorbidi karo, tilmaamayaasha waa in la hormariyaa si ka qeybqaadasho ah. Sidoo kale goor dhow waxaa jiri kara qiimeynta ka qeybqaasashada [eeg qeybta 2.2]. isticmaalka habka ka qeybqaadashada dadka waxa ay ku reebi doonaan inay ku lug lahaadaan oo caawiyaan marka la cabirayo saameynta dhabta ah nolosha (danwadaagta mudnaanta koowaad leh) ee mashruuca.

Waxaa kale oo muhiim ah in laga qeyb galiyo danwadaagta maadaama hey'adaadu ay ka heysato aragti cad waxa uu yahay barta madaxa hase yeeshee haddii deeq-bixiye uu u maleeyo si ka duwan waxaa dhici karta inaad u baahnaatid cadeyn daliil leh si aad ugu qanciso deeq-bixiyeyaasha.

1.8 Cabirka tilmaamayaasha

Mar haddii aad aqoonsato tilmaamayaasha, go'aan ka qaado sida aad u cabiri doonto tilmaamayaashaan. Sidee baad ku ururin doontaa macluumaadka? Waa inaad ku fikirtaa waxyaabaha hoos ku qoran:

* Hab noocee ah ayaad u isticmaali doontaa ururinta macluumaadka?
* Intee jeer baad u baahan tahay inaad ururiso macluumaadka iyo goorma?
* Xajmi intee le'eg ayuu noqon doonaa si aad u ururiso macluumaad sidee baad ku xulaneysaa mudnaantaada?
* Yaa ka mas'uul noqon doono macluumaadka la soo ururiyay, ka shaqeynta xogta, falanqeynta iyo soo jeedinta warka?
* Waa maxay baahida marka loo eego dhanka lacagta, waqtiga, xoogga dadka iyo ilaha qalabka?
* Maxay noqon doonaan qalabka loo isticmaalayo dhanka isgaarsiinta?
* Sidee baa loo qaban doonaa diyaarinta warbixinta, iyo intee jeer?
* Sidee iyo halkee baad ku keydin doontaa xogtaada, haddi ay tahay mid qoraal ah ama mid daabacan?
* Yaa ka mas'uul noqon doona dabagalka, iyo la qabsashada mashruuca haddii ay lagama maarmaan noqoto?

  Tusaale ahaan:waad cabiri kartaa xaalada nafaqeynta caruurta da'doodu ka yar tahay shan sano jir adiga oo la kaashaneysid haweenka ka tirsan bulshada, kuwa wax aqrin kara iyo kuwa aan wax aqrin karin. Waxa ay baran karaan sida loo cabiro Cududa Sare ayaga oo ku cabiraya cabirka midabeysan ee caadiga ah. Sida caadiga ah haweenka waxaa loo qeybiyaa laba laba ugu yaraan mid ka mid ah labada waa in ay awood u leedahay isticmaalka warqadda xisaabta lagu dejiyo. Kadib labada haween waxa ay cabirayaan ilmo kasta. Haddii ay la yimaadaan natiijooyin kala duwan kadib horjoogaha ayaa sameynaya cabirka sadexaad. Haddii ay isku raacaan,

natiijada waa la aqbalayaa. Marka la cabiraayo nafaqo-darada, haweenka waxa ay baranayaan sida lagu aqoonsado.

Tusaale ahaan:mid ka mid ah tilmaamayaashaada waa 'Mudo sadex sano ah, 75% oo ka mid ah qoysaska mashruuca bulshada in ay lahaan doonaan beero khudaar ah iyo in ay u isticmaalaan khudaartaas cuntada qoyska.' Intii lagu guda jiray horumarinta mashruuca, qof kasta waxa ay isku raaceen ruuxa qaban doono kormeer hawleedka joogtada ah: xubnaha Gudiga Caafimaadka. Ayaga waxaad ka doonaysaa in ay kormeer ku bixiyaan haddii mashruucu ku talaabsanyo horumar iyo waxaa la isku raacay in ay hawshaan la qaban doono bil kasta laba jeer, oo ay ku daba xigto kal-fadhi dib u eegis ah hal sano markii ay ka soo wareegto. Sidoo kale waxaad kale oo go'aan ka qaadaneysaa ruux mas'uul ka noqon doona gacan-ku-siinta booqashada lagu booqanayo bulshada, ururinta xogta aan bisleyn, ka shaqeynta iyo falanqeynta – oo ay ka mid yihiin sida hawshaan loo qaban doono iyo qofka ka mas'uul noqon doono dabagalka.

Guud ahaan tirada macluumaadka aad soo ururin kartid iyo habka aad u isticmaali doontid waxaa go'aamin kara ilaha iyo waqtiga aad heysatid.

La tashi lala sameeyo danwadaagta muhiimada koowaad leh waa hawl waqti badan qaadaneyso hase yeeshee uma baahna xarun farsamo. Ururinta macluumaad tiro badan sidoo kale waa hawl waqti badan qaadaneyso waxaana dhici karta in loo baahdo shaqo kombiyuutar ah si loo falanqeeyo xogta. Ayada oo arintaan maskaxda lagu hayo, waxaa kale oo u baahan tahay inaad tixgeliso arimahaan soo socda:

* Miyaad la imaan kartaa warqada diiwaanka oo qaas ah oo loogu talo galay xubnaha gudiga dadka wax aqrin kara iyo kuwa aan wax aqrin karin?
* Miyaad ku qori doontaa natiijada warbixintaada biloodka ah, miyaad ku soo koobi kartaa xogta ku ursursan kombiyuutarka oo horay u jirtay, ama abuuran kartaa xog habeysan oo gaar ah oo loogu talo galay macluumaadkaan?
* Sidee baad ugu gudbineysaa natiijada adiga oo dib ugu celinaaya danwadaagta kala duwan?
* Deeq-bixiyeyaasha kuwee loo baahan yahay in la wargeliyo?
* Haddii natiijadu ay tahay mid niyad jab ah, yaa ka mas'uul noqon doono si arintaas talaabo looga qaado?

Shaacinta cayiman iyo qorsheynta kormeerka iyo qiimeynta oo ku qoran marxaladaan is diyaarinta ah waxa ay sahli doontaa kormeerka dhabta ah iyo qiimeynta goor dambe. (Hadii aad u baahan tahay faahfaahin dheeraad oo ku saabsan kormeerka iyo qiimeynta eeg qeybta 2aad).

1.9 Qorshe Hawleedka

Talaabada xigta waa in loo bedelo ulajeedoyinka iyo istaraatiijiyada qorshe hawleed. Qorshe hawleedka waxa uu ka kooban yahay aalado dhowr ah:

* **Hawlaha Waxqabadka**: hawlaha waxqabadka kuwee baa u baahan in la sameeyo si loo gaaro ulajeedooyinka? Goorma, halkee, iyo kuma?

MAAREYNTA WAREEGA MASHRUUCA

* **Talooyinka loo baahan yahay**: maxaan u baahanahay hadii loo baahdo dad, dhaqaale, iyo ilaha qalabka? Imisa mudo oo waqti ah ayaa loo baahan yahay?

* **Wax soo saarka la filaayo**: maxaan fileynaa inaan guul ka gaarno? Maxay noqon doontaa natiijada hawlaha gaar ahaaneed iyo talooyinka intii lagu guda jiray koorsadaan mashruuca ah?

* **Tilmaamayaasha** (eeg kor)

* **Cadeyn**: sidee baad ku cadeyn kartaa in cabirka tilmaamaha uu sax yahay? Tusaale ahaan sidee baad ku cadeyn kartaa in khudaar farabadan ay qoysaska u isticmaalaan cuntadooda?

* **Saameynta la filayo**: saameyn noocee ah ayay hawsha ama dhaqdhaqaaqa ku lahaan doontaa danwadaagta (mudnaanta koowaad)?

* **U maleynta**: kuwani waa arimo kuwaas oo aad muhiim ugu ah mashruuca, hase yeeshee way ka baxsan yihiin baaxada iyo gacan-ku heynta. Malaha waa jawaabta su'aasha ‘'waa maxay sababaha banaanka ah oo wax saameyn ku laheyn dhaqdhaqaaqa hey'ada aan dowlig aheyn, hase yeeshee saameyn ku yeelan karta qorshaha?" Tusaalooyin: jawiga siyaasada, baaxada roobka yimaada ee xiliga dabeylaha mansuunka; xaaladaha dagaalka; sicirka caalamka ee bacriminta.

* **Shuruuda**: shuruuda waa u-maleynta ugu horeysa uguna muhiimsan ee malada aad qeexeysid. Shuruuda sida caadiga ah waa siyaasad taas oo u baahan in la meeleeyo , ama heshiis ay gaareen qof ama koox aad muhiim ugu ah mashruuca. Hadii shuruuda la haleeli waayo waqtiga bilowga ee mashruuca, heerkaada khatarta waa halis.

  Tusaale ahaan: haddii aad dooneysid inaad bilaabtid barnaamij kaas oo u baahnaan doontid miraha abuurka beeraha oo wanaagsan, iskaashi aad la sameysid waaxda beeraha ee wasaarada ayaa lagama maarmaan noqon karto si loo helo helitaanka miraha abuurka beeraha.

* **Jinsiga**: sidee baa dadka kala jinsiga duwan oo saaxiibo ah uu ka yahay mashruuca qorshaha? Mashruuca miyuu keenayaa sinaanta jinsiga? Baahida raga iyo dumarka miyaa la gaarayaa (Haddii lagu dabaqi karo)?

* **Waqtiga xadidan**. Qorshe hawleed waxa uu u baahan yahay waqti xadidan sidaas daraadeed waad ogaanaysaa, tusaale ahaan:
  — Goorta aad qabanayso dhowr dhaqdhaqaaq hawleed?
  — Goorta aad fileysid natiijada?
  — Goorta aad cabiri doonto saameynta la filayo?

1.10 Miisaaniyada

Iminka waad ogtahay waxyaabaha aad dooneysid inaad sameyso iyo sida aad u dooneysid inaad u qabato. Talaabada xigta waa diyaarinta miisaniyada. Arintani waxaa loo baahan yahay in la helo maamul maaliyadeed oo hufan, qorsheyn habeysan iyo kormeer. Waxaa laga yaabaa inaad horay u heshay lacag; haddii kale waxaa waajib kugu ah habka aad ugu dhowaaneyso deeq-bixiyeyaasha aad na u qortid arji dalab maaliyadeed.

Miisaaniyada waa in ay ku jirto dhamaan qalabka, dhaqdhaqaaqa hawleed iyo ilaha kheyraadka loo baahan yahay si loo hirgeliyo mashruuca. Waa in uu ahaada mid ku fadhiya xaqiiqo dhab ah, isticmaalka sicir dhab ah oo macquul ah iyo cadadka tirada, haddii aad rajeyneysid inaad ku qanciso deeq-bixiyeyaasha in ay maal-gelin ku sameeyaan mashruuca – waa inaad hubisaa in mashruuca lagu hirgelin karo sida loo qorsheeyay.

* Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan miisaaniyada, eeg: https://www.mango.org.uk/guide/budgeting

1.11 Qiimeynta halista natiijo xun

Dadka qaar waxa ay tixgeliyaan in arintaan ay tahaycarbin muhiim ah si loo gaaro dhanka gunaanadka marxalada qorsheynta. Mararka qaarkood waxaa loogu magac daraa ‘Hubaasha hubinta tayada’. Hadafku waxa uu yahay in dib loogu gurto mashruuc qorsheysnaa lagana fikiro dhamaan siyaabooyinka suurto gal noqon kara kuwaas oo khaldami kara. Kadib, dhibaato kasta oo suurto gal noqon karta taas oo la aqoonsaday, kooxda waxa ay u tixgelin karaan haddii ay heystaan dabacsanaanta iyo ilaha kheyraadka lala qabsan karo.
Waxyaabaha la tixgelinayo waxaa ka mid ah:

Cilmiga farsamada casriga

* Sida la aqbali karo ee cilmiga farsamada casriga?
* Mudo intee le’eg ayaa cilmiga farsamda casriga la awoodi karaa?
* Mudo intee le’eg ayay cilmiga farsamda casriga ay shaqeyn kartaa?
* Wax lacag ah ma jiri kartaa oo lagu isticmaalo hagaajinta qalabka cilmiga farsamada casriga ah?
* Cilmigaada farsamada casriga markasta waxa ay goysaa qiimo badan qofka isticmaalayo – waqti,lacag. Halkee bay ilaha kheyraadkaas ay ku dambeynayaan haddii mashruucu uusan qabsoomin?

Danwadaagta mudnaanta koowaad leh

* Kuwee ayaad doonaysaa inaad la xiriirto?
* Kuwee ayaa wax xiriir ah la sameyneynin – iyo sidee bay ugu jawaab bixin doonaan?
* Maxaad ka fileysaa danwadaagta mudnaanta koowaad leh?

Shaqaalaha

* Adiga miyaad tababareysaa wax shaqaalo ah? Maxaa ayaga ku dhici doona markii uu mashruucu dhamaado? Ayaga miyay filayaan mustaqbal shaqo?

* Ayaga miyey markasta u baahnaan doonaan kormeer? Maxaa khaldami kara haddii aan shaqaalaha la kormeerin?

Waqtiga xadidan

* Waxaad u heysataa qorshaha waqti cayiman oo xadidan, lacag iyo dad.maxaa khaldami kara haddii aysan isku dhigmin?

Ulajeedooyinka iyo dhaqdhaqaaqa hawleed

* Dhaqdhaqaaqa hawleed miyay u dhigmaan ulajeedooyinka degsan?
* Dhamaan ulajeedooyinka miyey leeyihiin tilmaamayaal cad cad?
* Ulajeedoyinka iyo dhaqdhaqaaqa hawleed miyey ku saleysan yihiin jinsiga saaxiibtinimo?

2. Wajiga Fulinta iyo Kormeerka

Wajiga Fulinta waa mudada taas oo mashruuca dhab ahaan la dhaqan gelinayo iyo dhaqdhaqaaqa hawleed ee qorsheysan la hirgelinayo. Inta lagu guda jiro wajigaan kormeer joogta ah ayaa sidoo kale lagama maarmaan ah:

* In la sii wado tayada shaqada taas oo socota
* In la hubiyo mashruuca inuu u jiheysan yahay meeshii saxda aheyd ee loogu talo galay oo ah ulajeedooyinka degsan
* In horay loo ishaaro lana aqoonsado dhibaatooyinka.

Wajigaan waxaa muhiim ah in si joogto ah lagu soo celceliyo qiimeynta halista iyo in la hubiyo haddii danwadaagta ay isku mowqif yihiin. Natiijada iyo cilmiga laga helay kormeerka waa in dib loogu qotomiyaa naqshada mashruuca – iyo, halkii lagama maarmaan ah, sixitaanka ama hagaajinta waa in lala yimaadaa.

Dhaqan-gelinta waxba u hagaagi maayo sidii loogu talo galay, qorshe dhowr ah umbaa la hirgeliyaa inta lagu jiro waqtigii cayimnaa. Maamulka waxa uu u baahan yahay macluumaad lagu kalsoon yahay oo isdaba joog ah – iyo miisaan baaxad weyn oo leh dabacsanaan. Dhibaatooyinka markasta way soo baxayaan.

Tixgeli sida aad ugu jawaab celin doontid haddii, aad tiraahdid:

* Sahayda waa la hakiyaa ilaa ugu yaraan hal bil;
* Waxaa laguu sheegayaa in kala bar shaqaalaha ay sheeganayaan xog been abuur ah;
* Bulshada way ka caroonaysaa maxaa yeelay waxa ay u maleynayaan in arintaan looga faa'iideystay;
* Bulshada waxa ay joojinaysaa waxa ay horay u balan-qaadeen.

Sameyso liis adiga kuu gaar ah oo lagu qoro waxa laga yaabo in ay khaldami karaan iyo sidii aad ugu jawaab bixin laheyd.

2.1 Kormeer

Fulinta waa isbedelka geedi-socodka. Waxaa lagaa doonayaa inaad si joogta ah u hubiso haddii aad ku taagan tahay wadadii saxda aheyd ama haddii aad u weecatay wadadii khaldaneyd. Haddii natiijooyinka aysan aheyn sidii aad rajeynaysay, waxaa dhici karta in hawshu ay gaabiso ama dadkii ay ka dhamaato dhiiro-gelintii ay horay u lahaayeen – hadaba waa in talaabo la qaadaa. Habka isbedelka waa sidii ilmo socod barad oo kale: marna dhacaya marna istaagaya. Marnaba ha ka niyad jabin. Ku raaxeyso natiijooyinka wanaagsan iyo la qabsiga istaraatiijooyinkaada degsan goortii ay jiraan natiijooyin xun.

Sidaas daraadeed, inta lagu guda jiro mashruuca, kormeerka waa lagama maarmaan – si aad u ogaato haddii barnaamijka iyo dhaqaaqa hawlaha ay yihiin kuwa wax ku ool ah, iyo sida loogu baahan yahay la qabsiga istaraatiijiyada si loo hubiyo natiijooyinka ugu wanaagsan uguna macquulsan. Bal qor: qorshe in la sameeyay, hada miyaan fulinaynaa qorshaha waqtiga ku haboon iyo miyaan isticmaaleynaa siyaabihii saxda ahaa, dadka iyo nidaamka?

MAAREYNTA WAREEGA MASHRUUCA

Sababaha kormeerka:

* Macluumaad joogta oo sugan waa muhiim si loo hubiyo in barnaamijyada ay yihiin kuwa isla xiriirsan oo wax ku ool ah.
* Kormeerka joogtada ah waxa uu u ogolaanayaa maamulayaasha barnaamijka in ay go'aan ka gaaraan talaabooyinka mudnaanta koowaad iyo hagida dib-u-eegista barnaamijyadooda.
* Kormeerka joogtada ah waxa uu u ogolaanayaa maamulayaasha barnaamijka in ay aqoonsadaan dhibaatooyinka soo socda iyo go'aan ka gaarida saameynta ka jawaab celintooda.
* Macluumaadka joogtada ah oo sugan micnihiisu waa in su'aalo la weydiin karaa taas oo caawin doonta qiimeynta – haddii, tusaale ahaan barnaamijka uu yahay mid saameynaya dhibaatada la doonayo in wax laga qabto.
* Macluumaad ka soo jeeda kormeerka joogtada ah waxaa loo isticmaali karaa dib u eegista, qiimeynta iyo ulajeedooyin kale.

Kormeerka waxa uu u muuqdaa hawl adag hase yeeshee waa in uusan sidaa noqonin. Waa dhaqdhaqaaq hawleed oo ku saleysan xog ururin. Aqoonta iyo khibradaha loo baahan yahay waxa ay la mid yihiin sida kuwa qiimeynta iyo falanqeynta. Run ahaantii kormeerkaada waa qorshe horay u soo dejiyeen tilmaamayaasha wax qeexaya iyo sida loo soo ururiyo macluumaadka tilmaamayaashaan.

Waxa ay caawineysaa in la isticmaalo la qabsiga nidaam kormeer ah ee quseeya xaaladahaada iyo baahidaada. Mashaariicda qaarkood way ka sahlan yihiin marka loo barbar dhigo kuwa kale. Haddii aad caruurta talaaleysid, wey fududahay in la tiro koobo caruurta lana dejiyo saamiga dhamaan caruurta oo idil kuwa la talaalay iyo kuwa aan la talaalin. Isbedelka dabeecadaha ama duruufaha ayaa aad u adag in lala socdo, hase yeeshee isticmaalka tilmaamayaasha wanaagsan ee markii bilowga ahaa ayaa fududeyn karo hawshaan.

Qaar ka mid ah dhinacyada dheeraadka ah ee ah in laga fikiro:

* Macluumaadka la ururiyay waa in ay isla xiriirsan yihiin si toos ah barnaamijka – si kale haddii loo dhigo, waa in ay yihiin kuwa waxtar leh lana dhaqan-geliyaa. Sidoo kale waa in diiwaan loo suubiyaa, looguna diyaariyaa si kasta oo loogu baahdo qeybaha kale iyo hey'adaha, sidoo kale dadweynaha ay saameysay.
* Qalabka is-gaarsiinta la isticmaalay (nidaamka faafinta, luuqada, iwm) waa in ay ahaadaan kuwa ku haboon ayna heli karaan dhegeystayaasha loogu talo-galay. Warbixin ku aadan deeq-bixiyeyaashaada waa in ay noqotaa mid si rasmi ah u qoran. Hase yeeshee macluumaadka la siiyay danwadaagtaada aan waxba qori karin waxna aqrin karin waa in ay ahaataa nidaam ayaga ay fahmi karaan. Xaaladaha qaarkood waxaa dhici karta in aad go'aan ka qaadatid inaad qabato seminaar si aad ugu soo bandhigto natiijooyinka, kala hadasho natiijooyinka kadibna laga wada xaajoodo talaabooyinka xiga ee la qaadayo.

La socodka kormeerka waxa uu awood kuu siinayaa in aad ogaato:

* Waxyaabaha wanaagsanaaday
* In uu ahaa nidaam sax ah oo la isticmaalo, in uusan aheyn – iyo muxuu u ahaan waayay.

* Haddii ilihii kheyraadka saxda ahaa la isticmaalay
* Haddii inta lacag lagu kharash-gareeyay ay xiriir la leedahay natiijada
* Haddii dadka ay dareemayaan in ay ku lug leeyhiin barnaamijka

Tusaale ahaan: bulshada waxaa dhici karta in ay go'aan ku yeeshaan la socodka kormeerka haddii beerta khudaarta la qoday oo la ooday, iyo haddii miraha abuurka waqtigii saxda ahaa la heli karay sicirkana lagu wada-heshiiyay. Goor dambe, cabashooyin kadib, waxa ay ku dareen liiskooda kormeerka aragtida danwadaagta ay ka qabaan miraha abuurka ee kala duwan, dhadhanka khudaarta… iyo wax alaale wixii faalo ama talo ah.

Markii aad ogaato, la socodka kormeerka, in ay wax ka khaldan yihiin, waxaa waajib kugu ah in aad talaabo qaado.

Tusaale ahaan: mid ka mid ah miraha abuurka ayaa xumaaday, taas oo macnaheedu yahay waa in aad talaabo ka qaadaa si loo hubiyo in mashruuca dhaqaalo-beereedka uu ogaado sababta uuna la yimaado talooyin wanaagsan una soo marinaayo arimahaas dhanka Gudiga dadka qabanaayo hawsha la socodka kormeerka. Talaabo deg deg ah ayaa loo baahan yahay sidaa awgeed dalaga kale ayaa booskaa buuxin kara.

2.2 Saameynta Qiimeynta ka Qeyb-qaadashada (PIA)

Saameynta qiimeynta ka qeyb-qaadashada waxa ay ku lug leedahay isticmaalka qalabka ka qeyb-qaadashada, Marka loo geeyo nidaamka tiro-koobka caadiga ah, si loo cabiro saameynta kaalmada bani'aadannimo iyo horumarinta mashaariicda ee nolosha dadka. Nidaamkan waxa uu adkeynayaa ku lug lahaanshaha ka qeyb-galayaasha iyo xubnaha bulshada ee dhanka qiimeynta saameynta mashruuca – iyo aqoonsigooda maadaama ay dadka khubarada ah ay muujinayaan isbedelo.

Dhaqan ahaan, qiimeynta waxa ay u muuqataa in diirada la saaro cabirka siyaabaha fulinta mashruuca, sida gaarsiinta gashiga iyo adeega, tirada goobaha biyaha ee la dhisay ama tirada dadka la tababaray. PIA ulajeedkeeda waa cabirka saameynta dhabta ah ee mashruuca marka loo eego dhanka nolosha ka qeyb-galayaasha mashruuca.

Sidaa awgeed, ilaa iyo intii suurto-gal ah, PIA waa in ay isticmaashaa tilmaamayaasha kuwaas oo ay aqoonsadeen bulshada ama kuwa loogu talo-galay ee ka qeyb-qaadanaya mashruuca. Bulshoyinka waxa ay leeyihiin mudnaantooda gaarka ah si ay u hagaajiyaan noloshooda, iyo siyaabo ayaga u gaar ah ee ku aqoonsanayaan tilmaamayaasha saameynta muujinaya iyo cabirka isbedelka. Inta badan kuwani way ka duwan yihiin mudnaanta iyo tilmaamayaasha ay aqoonsadeen khalkhal-geliyeyaasha dibeda ka jooga mashruuca.

Heerka mashruuca PIA waxa uu isku dayayaa inuu ka jawaabo sadexda su'aalood oo muhiim ah hoosna ku qoran:

1. Maxaa isbedel ah oo ku yimid bulshada ilaa iyo intii la bilaabay mashruuca?
2. Isbedeladaan kuwee baa la oran karaa waxaa loo aanayn karaa mashruuca?
3. Waa maxay kala duwanaanshaha isbedeladaan ay ku sameysay nolosha dadka?

* Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Saameynta Qiimeynta ka Qeyb-galayaasha PIA iyo nidaamka loo isticmaalo waxaa laga heli karaa *Participatory Impact Assessment [Tusmada Naqshada] (A Design Guide)*: **http://fic.tufts.edu/publication-item/participatory-impact-assessment-a-design-guide/**

2.3 Qeybinta Macluumaadka

Macluumaadka aad qeybineyso waa in ay ahaadaan kuwa kooban oo lagama maarmaan ah, looguna tixgelinaayo qofka u baahan inuu ogaado waxyaabaha meesha ka socda. Waa maxay waxa ay doonayaan in ay ogaadaan shaqaalaha hawl-galaya iyo bulshada? Maxaa u muhiim ah agaasimaha mashruuca in uu ogaado?

Tusaale ahaan:

* *Xilliga beerida, agaasimaha waxaa dhici karta in uu doonayo in uu ogaado imisa qoys ayaa dhulka fashay oo miro abuurtay. Ayada ama asaga uma baahna in ay ogaadaan magacyada, taariikhda iwm.*
* *Sargaalka qaabilsan taageerida mashruuca waxa uu u baahan yahay diiwaan-gelinta xiriirka uu la wadaago Xubnaha Gudigga, oo ay ka mid yihiin dood lagu lafo guraayo maxaa saxan (waa maxay sababta) meesha ay dhibaatooyinka ka jiraan (waa maxay sababta).*

Siyaabo kala duwan oo xiriir is-gaarsiineed ayaa loo baahan yahay. Kuwani waxa ay noqon karaan kuwa qoraal ah ama hadal rasmi ah ama si aan rasmi aheyn. Warqada diiwaan-gelinta ayay buuxin karaan kuwa aan wax aqrin karin.

* Isticmaal Macluumaadka Networklearning*: ururinteeda iyo isticmaalkeeda inta lagu dhex jiro Project Cycle si ay kuu caawiso:*
http://networklearning.org/index.php/library/information-its-collection-and-use

Sawirada markasta waa wax ku anfacay. Tusaale ahaan, si loo tuso sida tababarka u muuqdo. Gaar ahaan si loo tuso xaalad goor hore iyo goor dambe, sida dhul baadiye ah oo aan la beeranin oo ay ka soo horjeedo dhul beeran.

Hubi in aad isku eegi karto macluumaadka si loo ururiyo caddeyn loona gudbiyo macluumaadka saxda ah ayada oo la marayo wadada saxda ah kuna gaareyso qofkii saxda ahaa.

Tusaale ahaan:waxaa kaa soo gaaray hal tuulo fariin afka ah in ceelka iyo mashiinka biyaha soo saara la dayac-tiray mashiinkana hada uusi wanaagsan u shaqeynayo. Nidaamkaada isku-eegida macluumaadka adiga umbuu meel kuu yaalaa (ama qof kale) in ay aadaan tuuladii warka laga helay oona soo indho-indheeyaan haddii uu ceelku xaqiiq ahaan si sax ah u shaqeynayo.

La socodka kormeerka qiimeynta laba-laabanta [eeg qeybta xigta]. Aaladaha qaar loo isticmaali karo la socodka kormeerka iyo qiimeynta waa:

* Dooda iyo macluumaad is-weydaarashada wakiilada kale iyo danwadaagta;
* Warbixino qoraal ah;

* Isticmaalka kombiyuutarka ee dhanka falanqeynta (spreadsheets, databases, statistics, graphics);
* Isticmaalka jaantuska, meelaha ay wax ka soo unkameen, muuqaalo naqshadeysan, khariidada iwm;
* Isticmaalka video, swiro;
* Isticmaalka indho-indheyn.

Waxaad ku qori kartaa qorshahaada kormeerka barta bilowga. Bal eeg qorshe-hawleedkaada, go'aan ka qaado waxyaabaha aad kormeereysid, sida wax loo qabanayo iyo dadka wax qabanayo. Isticmaal tilmaamayaasha ku degsan qorshe-hawleedkaada si aad u aragto haddii aad ku taagan tahay wadadii saxda aheyd.

Tusaalaha barta bilowga ee kormeerka						
Mowduuca/ Talaabada la qaadayo	Tilmaamayaasha	Nidaamka xog ururinta	Waa kuweedadka	Inta jeer ee xog ururin	Habka warbixinta	Waa kuwee dadka falanqeynaya
	.					

Ayada oo ay ku xiran tahay natiijada, waxaa dhici karta inaad dib u booqatid ulajeedooyinkaada iyo istaraatiijiyadaada oo hadana la qabsato qorshe hawleedkaada.

3. Wajiga Qiimeynta

Qiimeynta markasta waa qeybta ugu dambeysa ee mashruuca ama dhaqan-hawleedka. Sidaas oo ay tahay hadana waa bilowga wajiga labaad, kordhin ama hindise soo jeedin cusub.

Sadex xaaladood oo qiimeyn ah waxaa loo kala duwi karaa sida soo socota:

* Kala-barka Xiliga, inta badan adiga oo ku daraysid kormeerka, mararka qaarkoodna waxaa loogu yeeraa qiimeynta;
* Kadib isla marka la soo af-jaro mashruuca;
* In yar kadib marka la soo-af-jaro mashruuca.

Shaqaalaha hey'ada waxa ay qaban karaan qiimeynta gudaha ah. Hey'ad madax banaan oo ka baxsan hey'adaan hawsha qabaneyso ayaa sameyn karta qiimeynta dibadda markastana waa in ay ku imaataa codsiga deeq-bixiyeyaasha. Qiimeynta sidoo kale waxa ay noqon kartaa mid loo qabtay si wadajir ah, shaqaale ka socda hey'ada iyo shaqaale kale oo ka socda hey'ad kale oo ka madax banaan. Isla hey'ada waxa ay sidoo kale awoodaa in si cad u bidhaamiso waxyaabaha ay u arkaan in ay muhiim tahay si loo qiimeeyo looguna daro qeexida Shuruudaha Tixraaca. Xasuuso in qiimeynta dhabta ah ee ka qeyb-qaadashada in ay ka mid ahaan doonto sidoo kale danwadaagta mudnaanta koowaad leh.

3.1 Qiimeynta Ula-jeedooyinka

Qiimeynta Ulajeedooyinka waxa ay noqon karaan laba-laab:

* In la qiimeeyo natiijada dhabta ah ee dhaqdhaqaaqa hawleed, iyo/ama
* In la qiimeeyo waxyaabihii laga bartay mashruuca.

Farqi kala duwanaansho ayaa la sameyn karaa asaga oo ah qeybo qiimeyn kala duwan, sida **qiimeynta hab-socodka hawsha,** halkaas oo aad ka eegeysid hab-socodka hawsha inta lagu guda jiro mashruuca iyo **saameynta** qiimeynta, halkaas oo aad ka eegeysid saameynta mashruuca leeyahay dhanka danwadaagta mudnaanta koowaad leh.

Kala soocis u dhexeysa qiimeynta **koboca** iyo **isku-darka** sidoo kale waa in la sameeyaa. Arintani waxa ay la xiriirtaa muuqaalka kaas oo ah qiimeynta lagu sameynayo. Qiimeynta 'Koboca' kani waa 'xisaabtanka dadweynaha', Qiimeynta 'isku-darka' kani waa 'horumarinta'.

Su'aalaha soo socda oo quseeya maareynta mashruuca iyo qorsheynta waxaa lagu baari karaa inta lagu guda jiro **qiimeynta koboca**:

Wax ku ool ah:

* Ilaa iyo xad intee le'eg ayaa laga guul gaaray ulajeedooyinka? …maxaa kharash ku baxay?
* Haddii ulajeedooyinka laga guul gaarin, waa maxay sababta? Maxay ahaayeen awoodii loo isticmaalay istaraattijiyada/talaabooyinka …maxayna ahaayeen arimaha lagu liitay ee daciifnimada keentay?

* Ulajeedooyinka weli ma yihiin kuwa taagan oo sax ah, ama waxa ay u baahan yihiin in la is-waafajiyo?
* Maxaa isbedel ah oo loo baahan yahay in la sameeyo si loo gaaro ulajeedooyinka?

Hufnaanta:

* Kharashka ma waafaqsan yahay saamiga faa'iidooyinka? Kharashkaan waxa uu tixraacayaa ilaha kheyraadka: xoogga dadka, waqtiga, tamarta, lacagta iyo qalabka.

Tusaale ahaan:

* *Haddii rag/dumar saacado badan looga baahan yahay in ay falaan ama qodaan beeraha, bacrimin aad qaali u ah la doonayo in dibada laga keeno, isu dheeli-tirka u dhexeeya gashiga iyo wax soo saarka laga yaabo in aysan sax aheyn.*
* *Haddii waqti dheeraad ah la siiyo, dadaal iyo lacag lagu kharash-gareeyay khudaarta hase yeeshee dadka beeraleyda ah ay ka goosanayaan khamriga beerahooda- mashruucaan waxa uu noqon karaa mid lacagtii la galiyay lagu qasaaray.*

Falanqeynta saameynta:

* Maxay aheyd saameynta shaqaalaha, hey'ada iyo danwadaagta?
* Waa maxay isbedelada uu la yimid mashruuca?
  isbedeladaan waxa ay noqon karaan kuwii loo baahnaa, hase yeeshee mararka qaar, kuwa aan la fileynin ayaa yimaada. Falanqeynta Saameynta Ka-Qeybqaadashada ayaa loo isticmaali karaa si loo fahmo fikradaha danwadaagta [eeg qeybta 2.2].

> *Tusaale ahaan: Mashruuca Waxbarashada Nadaafada oo ku xiran mashiinada biyaha soo saara oo la rakibay iyo beerida khudaarta ayaa walaac ku noqday dumarka in ay xakameeyaan xaalada guryahooda. Hey'adii aan dowliga aheyn ayaa kormeer hawleed ku bixisay geedi-socodka mashruuca markii lagu guda jiray dhamaadkii qiimeynta waxa ay isticmaaleen aalado lagala soo baxay Falanqeynta Qiimeynta Ka Qeyb-qaadashada. Natiijadoodii waxa ay noqotay in dumarka ay dareemeen awood dheeraad ah – iyo, wax aysan fileynin, Sidoo kale waxay sheegeen in shubankii uu ku yaraaday caruurta.*

Horumarka habeysan **Qiimeynta lagu daray** waxa ay diirada saari kartaa:

- Waxyaabaha hagaagay, iyo waxyaabaha aan hagaagin – iyo sababta?
- Waa maxay horumarka loo baahan yahay si loo helo wax ku ool dheeraad ah ama si loo gaaro ulajeedada?
- Waa maxay casharada meesha laga bartay iyo side aqoontaan loogu isticmaali karo qorshayaasha mustaqbalka ama mashruuca?
- Maxaad ka baratay dhaqamada iyo nidaamka la hirgeliyay?
- Nidaamkee baa si wacan u shaqeeyay, midkee baa shaqaynin?
- Waa kuwee dhaqamada ugu fiicnaa – kuwee baa lagu guul-dareystay si ay u aqoonsadaan waxyaabahaan inay caawiyaan qorsheynta mustaqbalka iyo inay wax ku soo kordhiyaan awooda hey'ada ama waxbarashada hey'ada.

Dhaqamada ugu wanaagsan ayaa mar kale la isticmaali karaa kuwa guul-darrada keenay waa laga tirtirayaa.

Qiimeynta Gudaha markasta waa horumar-habeysan.

Qiimeynta dhaqamada dadaalka qof leeyahay waa mid iska dabiici ah: dumarka waxa ay eegi doonaan haddii wax alaale wixii wasaq ah laga mayray shaatiga ka dib marki ay dhaqaan; ninka makaanikada gawaarida waxa uu eegi doonaa haddii matoorkii gaarigii uu hagaajiyay uu si fiican u shaqeynayo; farsamo-yaqaanka waxa uu marin doonaa gacmahiisa alwaaxa si uu u hubiyo haddii uu alwaaxu yahay mid siman.

3.2 Qiimeynta ka Qeyb-qaadashada

Qiimeynta ka Qeyb-qaadashada macnaheedu waa in dhamaan dadka oo idil ay ka qeyb ahaadaan mashruuca – heerar kasta oo kala duwan – ka qeyb-galka qiimeynta ka socota mashuuca iyo saameynta. Waxyaabaha diirada la saarayo ee qiimeynta ka qeyb-qaadashaa waa in lala hawl-galo kuwa loogu talo galay mashruuca, dhamaan dhinac kasta ee geedi-socodka hawsha – sidaa awgeed waxa ay wadaagayaan xakameynta qorshaha, xil-la wareegida hawsha, falanqeynta iyo hirgelinta waxyaabaha laga soo bartay geedi-socodka qiimeynta.

Hadafka qiimeynta ka qeyb-qaadashada:

* Waxaa intaa sii dheer, in la hormariyo oo la hagaajiyo mashruuca ayada oo si joogta ah looga baranayo lana isticmaalayo casharada oo lala qabsado mashruuca si ka wanaagsan markii hore lana waafajinayo macnahiisa gaarka;
* Si loo dhiso khibrado iyo aqoon midaas oo awood-siineysa talaabo waarta mustaqbalka;
* In lala xiriiro danwadaagta kuwa dibada iyo kuwa gudaha;
* In lala yimaado nidaam ku dhisan xisaabtanka mashruuca.

Qiimeynta ka qeyb-qaadashada waxa ay ka shaqeyneysaa labada dhinac ee xisaabtanka dadweynaha iyo afkaarta horumar habeysan (‘Kobaca iyo ku darka’, sidaan horay ugu sharaxnay qeybteenii hore).

Qodobada ugu muhiimsan, ama faa’iidooyinka, ee qiimeynta ka qeyb-qaadashada waa sida soo socota:

* Waxa ay xaqiijineysaa in ka qeyb-galayaasha ay uga qeyb-galayaan si firfircoon, oo aysan aheyn oo kaliya ilo-dadban oo macluumaad keenaya;
* Waxa ay dhiseysaa awooda dadka maxaliga ah ee deegaanka oo ay ku soo ururin karaan macluumaad, falanqeynkaraan, ka tarjumi karaan talaabo wax ku ool ahna ka qaadi karaan;
* Waxa ay taageeraysaa waxbarashada wadajirka ah ee dadka ku lug leh mashruuca, oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya heerarka kala duwan iyo siyaabo kala duwan;
* Waxa ay u dhaqmeysaa sidii waxyaabo gooni-gooni u shaqeeya si loogu caawiyo dadka in ay u go’doomaan inay talaabooyin dheeraad ah ka qaataan mashruuca ama bulshada.

4. Wajiga la Qabsashada

Wajiga la qabsashada, mashruuca ama barnaamijka waa la habeeyaa sidaas oo ku saleysan natiijada la socodka kormeerka iyo qiimeynta.

4.1 Casharada Quudinta oo horay loo soo bartay oo dib loogu isticmaalo qorsheynta

Inta lagu guda jiro kormeerka iyo qiimeynta, macluumaad ayaa la ururiyaa taas oo hagaajin karta mashruuca ama barnaamijyada. Hawlahaan waxa ay qeyb ka yihiin hawlo is-daba joog ah oo lagu xaqiijinaayo waa maxay baahida jirta, ka jawaab-celinta saxda ah, iyo isbedelada loo baahan yahay.

Natiijada kormeerka saxda ah waxaa la galin karaa qiimeynta hawlaha socda. Qiimeynta kadib, hey'ada aan dowliga aheyn waxa ay aqoonsan kartaa dhaqamada ugu wanagsan iyo casharada la bartay. Sidaas awgeed hawsha qorsheynta guud ahaan iyo qiimeynta ayaa mar kale bilaaban kara.

Sida caadiga ah, qiimeynta waxa ay keeneysaa talooyin cad cad oo quseeya isbedelada marka la eego "Maxaa dhacay" iyo "sidee wax u dhaceen". Hadafku waa in la hormariyo hufnaanta, wax ku oolnimada iyo saameynta dhanka mashruuca ama barnaamijka.